

WAR-SAXAAFADEED

UNICEF iyo la-hawlgalayaasheeda oo wax-ka-qabanaya halista saddex-geesoodka ah ee fatahaadaha, ayaxa iyo cudurka COVID-19

Carruur Soomaaliyeed oo ka badan 3 milyan ayaa u baahan gargaar bani'aadamnimo

MUQDISHO, 23 Luuliyo 2020 – Dad lagu qiyaasey 5.2 milyan oo ay ka mid yihiiin in ka badan 3 milyan oo carruur ah ayaa u baahan gargaar bani'aadamnimo taas oo ay sababeen dhibaatooyinka is-biirsadey ee fatahaadaha, ayaxa kacay iyo cudurkan dunida ku faafey ee COVID-19.

"Soomaaliya waa mid ka mid ah dalalka ugu nugul dunida, waa dal soo marey colaad tobannaan sano socotey, abaar iyo fatahaado meerto ku socda," ayaa uu yiri Jesper Moller, oo ah Ku-xigeenkii Wakiilka UNICEF Somalia. "Waqtigan la joogo, iyada oo xaaladdii jirtey ay uga sii dareen raadadka ay reebeen ayaxa kacay iyo cudurka dunida ku faafey ee COVID-19 ayaa waxaa taasi uu macnaheedu yahay in beesha caalamka looga baahan yahay in ay tallaabo degdeg ah qaaddo si ay gacan uga geysato badbaadinta nolosha malaayiin qoysaska Soomaaliyeed ah, gaar ahaan kuwa ugu nugul dadka – oo ah carruurta."

Carruurta ayaa badanaa ah dhibbanayaasha qarsoon ee xaalad kasta oo degdeg ah oo timaadda waxaana ay yihiiin kuwa ugu nugul cudurrada biyaha laga qaado ee ka dhashay fatahaadda iyo nafaqo-xumada ba'an ee ay sababtey cunto-yaraanta.

"Bilihiidh dhowaa ee la soo dhaafey, waxaa kor u kacay kiisaska cudurka Shaban-biyoodka Ba'an/Daacuuntka," ayaa uu yiri Moller. "Waxaa xaaladda sii murginaya, iyada oo ayaxa kacay uu uu raadka ugu horreeyo ku yeesho wax-soo-saarka dalagyada, iyada oo la saadaalinayo in uu boqolkiiba 10 ilaa 15 hoos uga dhaco celceliska dalagga soo go'a muddada fog, haddana raadka labaad waxaa uu ku dhacayaa carruurta iyada oo la saadaalinayo in ay kordhaan carruurta ay haleesho nafaqo-xumada ba'an ee ka dhalaneysa cunto-yaraanta."

Si dhibaatadan saddex-geesoodka ah wax looga qabto, ayaa UNICEF, oo si dhow ay hawsha isula duwayaan Dowladda iyo la-hawlgalayaasha degaanka, waxaa ay si hagar la'aan ah uga shaqeyneysaa in aaney keliya ka-hortegin oo aaney keliya khafiifin faafidda cudurka COVID-19, ee ay sidoo kale sii waddo in ay gargaar nolol-badbaadin ah siiso kuwa aadka ugu baahan gargaarka.

Iyada oo qayb ka ah dadaallada hadda socda, ayaa ku dhowaad 1 milyan oo dad nugul ah waxaa la gaarsiiyey agab mhiim u ah nadaafadda oo ay ka mid tahay helidda biyo nadiif ah iyo in ka badan 500,000 oo haween iyo carruur ah la gaarsiiyey adeegyada aasaasiga ah ee caafimaadka iyo nafaqada, dadkaas oo ku nool degaannada ay fatahaaduhu saameeyeen iyo xerooyinka barakacayaasha. Intaa waxaa dheer, in ka badan 500,000 oo qoys ayaa waxaa booqdey xubnaha bulshada wacyigeliya si ay kor ugu qaadaan wacyigooda ku aaddan tallaabooyinka looga hortegayo COVID-19.

Wadar ahaan lacagta gargaarka bani'aadamnimada ee ay UNICEF codsatey in loogu yabooho Soomaaliya waa \$129 milyan oo doolar iyo lacag kale oo \$35 milyan oo doolar

ah oo wax looga qabanayo cudurka COVID-19. Ilaa hadda, in ka badan 60% oo ka mid ah lacagtii la codsadey in loogu yabooho wax-ka-qabashada cudurka COVID-19 ayaa la heley, laakiin guud ahaan lacagtii loo doonayey wax-ka-qabashada xaaladda degdega ah, ayaa \$30 milyan oo doolar oo keliya laga heley.

#####

Ku-saabsan UNICEF

UNICEF waxaa ay ka shaqeysaa meelaha ay xaaladdoodu ugu adag tahay dunida, si ay u gaarto carruurta ugu liidata dunida oo dhan. 190-ka dal iyo dhul ee aan joogno, waxaan u shaqeynaa ilmo kasta, meel kasta ha joogee, si aan u dhisno duni qof walba u wanaagsan. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan UNICEF iyo hawsha ay u hayso carruurta, fadlan booqo oo ka eeg www.unicef.org.

Macluumaad dheeri ah, fadlan kala soo xiriir: Dheepa Pandian, UNICEF Somalia,
dpandian@unicef.org, +252 613375885